Baadhitaanka awoodda iyo xiiseynta akhriska ee interfenshanka ah (LuKiVa)

Waalidka sharafta lahow,

Ilmahaaga waxaa lagu casuumayaa baadhitaanka awoodda iyo xiiseynta akhriska lagaga baaraandegayo ee interfenshanka ah. Ilmahaaga ayaa ka qaybqaadana baadhitaanka oo qayb ka ah waxqabadka caadiga ah ee maalinlaha ah ee barbaarin-horaadka ama waxbarasho-horaadka. Baadhitaanka waxaa si wadajir ah looga hirgalinayaa waaxda barbaarinta iyo tacliinta ee magaalada Helsinki iyo jaamacada Aalto, jaamacada Jyväskylä iyo jaamacada Turku oo intuba ka wada shaqaynaya.

1. Baadhitaanka ujeedadiisu waa maxay?

Baadhitaanku wuxuu ka salgaadhayaa sida akhriska wadahadalku uu la socdo in wakhtiyada akhriska la fuliyo oo la kordhiyo wax u akhrinta carruurtu ay u horumarinayaan awoodaha akhriska iyo xiiseynta akhriska. Intaas waxaa dheer oo laga baaraandegayaa qaababka waxqabadka ee akhriska la xidhiidha ee kooxaha carruurta.

Baadhitaanka waxaa ka qaybqaadanaya goobaha waxqabadka ee barbaarin-horaadka iyo waxbarasho-horaadka ee Helsinki. Goobaha waxqabadka waxaa loo qaybiyay goobaha tijaabada iyo goobaha barbardhigga. Baadhitaanku wuxuu bilaabmayaa bisha Jannaayo ee 2026 wuxuuna dhammaanayaa bisha Maajo ee 2026.

Goobaha tijaabada ilmaha 5-6 sano jira (ilmaha dhashay sannaddada 2019 iyo 2020) ayaa labo mar toddobaadkii ka qaybqaadanaya wakhtiyada yar ee akhriska oo loo hirgalinayo qaab wadahadal ku salleysan. Wakhtiyada akhrisku waxaay carruurta u suurta galinayaan meel ay wax isku waydiiyaan, ay ku fikiraan oo ay fikradahooda kula wadaagaan dadka kale, isla markaas waxaa lagu xoojinayaa awoodohooda akhriska iyo xiiseyntooda akhriska. Maalmaha kale carruurta si xor ah ayaa wax loogu akhrinayaa. Goobaha barbardhigga awoodaha akhriska ee carruurta waxaa loo taageerayaa si lamid ah sidii hore. Haddii aad u baahato waxaad ilmahaaga macallinkiisa ama macallimaddiisa ka heli kartaa warbixinta khuseysa in uu ilmahaagu ku jiro kooxda tijaabada ama inuu ku jiro kooxda barbardhigga.

2. Waa maxay sababta ilmahaaga loogu casuumay baadhitaanka?

Baadhitaanku wuxuu qayb ka yahay shaqada qiimeynta iyo horumarinta tayada ee sharcigu dhigayo in lagu fuliyo magaalada Helsinki. Ilmahaaga xanaanadiisa ama goobtiisa waxbarasho-horaadka ayaa loo doortay baadhitaankan. Warqaddan waxaa loo diray waalidiinta kooxda tijaabada iyo kooxda barbardhigga ku jira labadoodaba.

3. Xog noocee ah ayaa baadhitaanka lagu ururinayaa?

Baadhitaanka waxaa xogta lagu ururinayaa qaab qiimeynta ilmaha ah. Qiimeynta ilmaha waxaa ku jira kara macluumaad baadhitaanada carruurta lagu helayo oo khuseeya awoodda akhriska iyo qiimeynta ilmaha ee macallinka. Ilmuhu macallinka kali ayaay ula sameynayaan casharada awoodda akhriska. Macallinka ayaa qiimeynaya ilmaha awoodihiisa luqadeed, sida uu u xiiseynayo akhriska, awoodda maareynta naftiisa iyo waxqabadkiisa marka uu xaaladda

akhriska ku jiro. Intaas waxaa dheer oo la ururinayaa maclumaadka ku saabsan wakhtiyada akhriska ee wadahadalka leh ee uu ilmuhu guga 2026-ka ka qaybqaatay tiradooda.

4. Maxaa ku dhacaya xogta la ururiyay?

Macluumaadka qiimeynta ilmaha waxaa lagu xidhiidhinayaa jaamacadaha Turku iyo Helsinki macluumaadka hore ee ay kooxaha ilmaha ka soo dirayaan. Markaas kaddib ayaa macluumaadka loo dirayaa jaamacadda Jyväskylä, halkaasna macluumaadka waxaa lagu xidhiidhinayaa wayddiimada macallimiinta laga qaaday. Wayddiimada macallimiinta waxaa lagu ururinayaa xog ku saabsan macallimiinta iyo kooxda carruurta wakhtiyadooda akhriska. Macluumaadka lagu xidhiidhiyay waxaa loo dirayaa Tilastokeskus (xarunta tirakoobka), halkaas ayaana macluumaadka oo dhan lagu xidhiidhinayaa ilmo kasta macluumaadka diwaanka ugu jira waxaana laga saarayaa xogta keeni karta, in ilmaha si toos ah loo aqoonsado. Jaamacadda Jyväskylä ayaa macluumaadka ka diyaarinaysa macluumaad cilmi-baadheyaasha kooxda baadhitaanku ay adeegsan karaan oo aanan ilmaha, macallinka, kooxda ilmaha ama goobta waxqabadka ee gaarka ah laga aqoonsan karin. Ka baaraandegista macluumaadka shaqsiga sharraxaadda ku saabsan ee faahfaahsan halkan ayaad ka heli kartaa.

Wareejinta macluumaadka iyo ka baaraandegisteedu waxaay mar walba u dhacaysaa qaab xogtu ammaan ku tahay.

5. Wax su'aal ah?

Haddii aad qabto su'aalo ama aad macluumaad dheeraad ah uga baahantahay baadhitaanka waxaad iimayl ku diri kartaa cinwaanka lukiva@jyu.fi ama vare.tptutkimus@hel.fi.

6. Ilaalinta ammaanka xogta iyo xuquuqdaada

Macluumaadka shaqsiga ee ilmahaaga looga baaraandegayaa si ammaan leh. Macluumaadka iyo waraaqaha baadhitaanka lagu fulinayo waxaa kaliya xor u ah inay gacanta ku dhigaan cilmi-baadheyaasha fasax u helay baadhitaanka. Xogta la ururinayo, ka baaraandegistooda iyo keydintooda waxaa lagu sharraxay qoraalka ilaalinta ammaanka xogta lagaga hadlayo. Qoraalka ilaalinta ammaanka xogta waxaa laga akhrisan karaa cinwaanka (www.educaflagship.fi/lukiva-tietosuojailmoitus).

7. Ka qaybqaadashada baadhitaanka

Carruurtu inay baadhitaanka ka qaybqaataan ma aha khasab ee waa ikhtiyaari. Ka baaraandegista macluumaadka shaqsiga ah waxaay ku salleysantahay baadhitaan cilmiyaysan iyo qiimeynta tayada waxbarashada oo sharciga ku xusan. Waalidku kuma khasbana inuu oggolaado in ilmihiisu ka qaybqaato. Waxaase u bannaan inuu diido inuu ilmihiisu ka qaybqaato isagoo ogaysiis dheeraad ah ka bixinaya oo aanan ku khasbanayn inuu sabab gaar ah sheego ama isagoo aanay wax cawaaqiib ah ka raacaynin.

Haddii aad ilmahaaga u oggolaan waydo inuu baadhitaanka ka qaybqaato la xidhiidh maamulaha xanaanadaada ama goobta waxbarasho horaadka una sheeg magaca ilmahaaga ama kooxdiisa. Maamulaha xanaanada ama goobta waxbarasho horaadka ayaa xogtaas diidmada ku saabsan u sii diraysa cinwaanka vare.tptutkimus@hel.fi.